# Shaqaalaha Daryeelka-guriga Shaqaalaha taageerada Shaqsiga

## Waxa la sameeyo haddii aad ku dhaawacantid shaqada

Shaqaalaha daryeelka-guriga iyo shaqaalaha taageerada shaqsiga (ka bilow Jan. 1, 2010) way u qalmaan magdhowga shaqaalaha ee ku daboolan dhaawacyada ka dhacaan shaqada. Fuddiga Daryeelka Guriga Oregon (OHCC) ayaa fudueysan xareynada sheegashooyinka magdhowga shaqaalaha. Shirkada SAIF waa qaadaha caymiska magdhowgaaga shaqaalaha.

### Sida loo xareeyo sheegashada:

Haddii aad u shaqeysid sida shaqaalaha daryeelka guriga Oregon ama shaqaalaha taageerada shaqsiga oo aad dhaawacantid adiga oo sameynayo waajibaadyadaada, waxaad xareyn kartaa sheegashada magdhowga shaqaalaha. Tallaabooyinka sahlan ee xigga waxay hubinayaan in sheegashadaada si sax looga baarandagaay.

1. U sheeg macmiilkaaga/badrooniga isla markaas aad dhaawacantay adiga oo ka shaqeynayo gurigiisa ama gurigeeda
2. Kala xiriir xiriiriyaha magdhowga shaqaalaha Guddiga Daryeelka Guriga Oregon (OHCC) 888.365.0001 ama 503.378.3099 (Salem)
3. U sheeg wakiilka inaad tahay shaqaalaha daryeelka guriga ama shaqaalaha taageerada shaqsiga oo aad rabtid inaad sheegasho xareysid
4. Haddii aad u raadineysid daaweynta caafimaadka dhaawaca shaqadaada, u sheeg dhaqatrka inaad ku dhaawacantay shaqada. Weydii oo buuxi Foomka 827. Isu sheeg nafsataada sida shaqaalaha daryeelka guriga ana shaqaalaha taageerada shaqsiga ee foomkaan.

Haddii aadan la xiriiri karin qadka wargelinta kore, ka soo wac SAIF 800.285.8525 oo weydii foomka sheegashada ee boosto ahaan loogu dirayo. Isu sheeg nafsataada sida shaqaalaha daryeelka guriga ana shaqaalaha taageerada shaqsiga ee foomkaan oo ku soo celi foomka dhameystiran.

**SAIF Corporation**
**400 High Street SE**
**Salem, OR 97306**

### Si loo illaaliyo xaquuqahaaga oo lagaaga caawiyo ka baarandaga sheegashadaada:

- Ku soo wargeli dhaawac walboo markaas
- Si dhaqso uga jawaab wacitaanada taleefonka iyo waraaqaha ka imaanayo xiriiriyaha magdhowga shaqaalaha OHCC iyo warbixinta ay codsaneyso SAIF
- Buuxi oo soo celi Foomka 801
- Saxiix foomka siideynta caafimaadka si markaas warbixinta caafimaadka ee ku saabsan dhaawaca la isu keeni karaa si looga baarandago sheegashadaada
- Xiriiri dadaadalada SAIF iyo xiriiriyaha magdhowga shaqaalaha OHCC inay kuu soo celiyaan shaqo ku meelgaar ah haddii aysan kuu suurtogaleynin inaad sameysid shaqooyinkaaga caadi ahaan laguugu xilsaaray

**Si loo xareeyo sheegasho haddii aad ku dhaawacantahay shaqada:**

1) U sheeg macmiilkaaga/shaqaalaha islamarkaas inaad dhaawacantay
2) La xiriir: **Xiriiriyaha magdhwoga shaqaalaha Guddiga daryeelka Guriga Oregon**
   **Taleefonka: 888.365.0001 ama 503.378.3099 (Salem)**
3) Isu aqoonso nafsadaada sida **shaqaalaha daryeelka guriga ama shaqaalaha taageerada shaqsiga**
4) Haddii aad raadineysid daaweynta caafimaadka, u sheeg dhaqatrka inaad ku dhaawacantay shaqada. Isu aqoonso nafsadaada sida **shaqaalaha daryeelka guriga ama shaqaalaha taageerada shaqsiga** oo ha ogaado dhaqtarkaaga caafimaad in qaadaha caymiskaaga yahay SAIF.

Haddii aaysan kuu suurtogaleynin inaad la xiriirtid magdhowga shaqaalaha OHCC, xiriiriyaha, fadlan kala xiriir **Shirkada SAIF 800.285.8525**